# Maareynta Hannaanka Siyaasadeed ee Cusub

03 | Faallo

Luulyo
2026

***Xuquuqda daabacaaddan © 2026 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.***

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

***© Heritage Institute 2026.***

Khilaafka ka taagan doorashooyinka Soomaaliya waxaa inta badan lagu tilmaamaa muran dastuuri ah. Dowladda Federaalka waxay doonaysaa in dalka laga qabto doorasho qof iyo cod ah, ama ugu yaraan hannaan isku-dhafan oo u dhow. Kooxaha mucaaradku waxay ku doodayaan in ka guuridda nidaamka awood-qaybsiga beelaha ku dhisan uu u baahan yahay is-afgarad siyaasadeed kaas oo aan weli la gaadhin. Saaxiibbada caalamkuna waxay ku baaqayaan in dhinacyadu wada hadlaan. Inkasta oo haddii aan sidaas u sifeyno ay sax tahay, haddana taasi si buuxda badanaa ugama turjunto asalka khilaafka. Arrinta salka u ahi waa in isu-dheellitirkii awoodeed ee jaraha u ahaa siyaasadda Soomaaliya soddonkii sano ee u dambeeyey uu maanta u muuqdo mid isbeddel ku yimid.

Muddo dheer oo ka dambaysay burburkii dowladdii dhexe, hannaanka siyaasadeed ee Soomaaliya waxa uu ku tiirsanaa labo nooc oo taageero dibadeed ah oo is-kaabaya.

Nooca koowaad wuxuu ahaa taageero siyaasadeed oo ku dhisnayd hannaan caalami ah oo saldhiggiisu ahaa magaalada Nayroobi. Caasimadda Kenya waxay ahayd xarunta ugu weyn ee diblomaasiyadda Soomaaliya, halka Maraykanka, Midowga Yurub, Qaramada Midoobay iyo daneeyeyaal kale oo caalami ahi ay bixiyeen aqoonsi diblomaasiyadeed, isku-dubarid dhaqaale, isla markaana ay dhexdhexaadinayeen mar kasta oo siyaasiyiinta Soomaalidu isku mari waayaan arrimaha siyaasadda. Tani ma ahayn oo keliya hannaan taageero uun balse waxay si toos ah u qaabaysay duruufihii ay dhinacyada Soomaalidu ku kala aragti duwanaan jireen, ku gorgortami jireen, uguna gaadhi jireen heshiisyo siyaasadeed. Ta ugu muhiimsanina waa in ay abuurtay hannaan ay nolosha siyaasadeed ku sii socon karto mar kasta oo heshiisyada guduhu burburaan.

Nooca labaad ee taageeradu wuxuu ka shaqayn jiray gudaha Soomaaliya. Hawlgalkii milatari ee Midowga Afrika wuxuu u idmanaa sugidda amniga magaalada Muqdisho. Maraykanku wuxuu diiradda saaray la-dagaallanka argagixisada iyo tababarka cutubyo ciidan oo gaar ah. Turkiguna wuxuu hirgeliyey barnaamij dib-u-dhis dowladeed oo isugu jiray tababarka ciidamada iyo dib-u-habaynta kaabeyaasha dhaqaalaha iyo hay'adaha maamulka ee caasimadda dalka.

Labadan heer ee taageeradu way is-dhamaystirayeen. Midkood wuxuu bixiyey aqoonsi siyaasadeed, taageero dhaqaale iyo qaab-dhismeed dibadeed, halka kan kalena uu suurto-geliyey in dowladda ay si wax-ku-ool ah awooddeeda uga fuliso gudaha dalka.

## Isbeddelka Muuqaalka Siyaasadeed

Qaab-dhismeedka siyaasadeed ee aan xusnay hadda wuxuu galay marxalad isbeddel ah. Iyadoo Dowladda Federaalka ee fadhigeedu yahay Muqdisho ay si tartiib tartiib ah u dhisatay qaar ka mid ah hay'adihii iyo awoodihii caadiga ahaa ee dowladnimo taas oo keentay in doorkii hannaankii caalamiga ahaa ee saldhiggiisu Nayroobi ahaa oo saameyntiisu sii yaraanayso. Go'aannadii hore inta badan lagu qaabayn jiray Nayroobi waxaa maanta lagu jaangooyaa Muqdisho iyada oo ay gaarayaan masuuliyiin Soomaaliyeed.

Isbeddelka ugu baaxadda weyni wuxuu ka dhacay dhinaca amniga caasimadda. Muddo sannado ah Muqdisho waxay la daalaadhacaysay khatar joogto ah oo ka imanaysay weerarrada Al-Shabaab. Weerarro waaweyn ayaa si joogto ah u dhici jiray, ganacsiguna wuu xaddidnaa, wasaaraduhuna waxay ku shaqayn jireen darbiyo adag oo looga gaashaanto qaraxyada, halka inta badan hawlaha siyaasadda iyo bulshaduba ay ku socdeen xaalado amni oo aad u adag.

Intii u dhaxaysay 2022-kii iyo 2024, culayskaasi si muuqata ayuu u yaraaday. Gulufkii militari ee dowladdu bilowday bishii Agoosto 2022, kaas oo ay garab istaageen maleeshiyaad beeleed isla markaana ay taageero dhinaca cirka ah ka geysteen Maraykanka iyo Turkigu, waxaa wejigiisii koowaad dib loogula wareegay in ka badan 215 magaalo iyo tuulo. Gudaha Muqdisho, weerarradii waaweynaa aad bay u yaraadeen, isbeddelkaas oo dad goob-joog ahi ku sababeeyeen gulufka militari iyo adkayntiyo xakamaynta goobaha laga soo galo magaalada.

Yaraanshaha culayska amni wuxuu abuuray fursad dib-u-soo-kabasho. Dhaqdhaqaaqii ganacsigu wuu kobcay, maalgashigii qurba-joogtuna wuu kordhay, waxaana bilowday dhismeyaal iyo is-ballaarin. Dhaqdhaqaaqa dekedda iyo garoonka diyaaradaha ayaa isna kor u kac sameeyay, taas oo kordhisay dakhliga soo gala gacanta dowladda.

Isbeddelkan waxaa sidoo kale aqoonsaday beesha caalamka. Bishii Diseembar 2023, Soomaaliya waxay gaadhay heerkii ugu dambeeyey ee barnaamijka **Heavily Indebted Poor Countries (HIPC) (Dalalka Saboolka ah ee Deynta Badan lagu leeyahay),** taas oo u suurto-gelisay in laga cafiyo deyn dhan 4.5 bilyan oo doollar, isla markaana hoos u dhigtay deyntii dibadda ee dalka oo ka soo dhacday 64% wax-soo-saarka guud ee gudaha (GDP) sannadkii 2018 una dhacday wax ka yar 6%. Sidaas darteed, Soomaaliya waxay markii ugu horraysay muddo soddon sano ku dhow dib u heshay fursad ay uga faa'iidaysan karto amaahda hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah. Sidoo kale, hay'adaha dowladda ayaa bilaabay inay si joogto ah u gutaan waajibaadkooda, halka hay'adaha dadweynuhuna ay si nidaamsan u fuliyaan qorshayaal iyo mashaariic.

Horumarradan waa kuwo dhab ah, hase yeeshee waxa jira laba arrimood oo muhiim ah oo mudan in la xuso.

Tan koowaad waa in dib-u-soo-kabashadani aanay weli ahayn mid la hubo, isla markaana hadda lagu jiro marxalad lagu tijaabinayo adkaysigeeda. Tan iyo bilowgii 2025, Al-Shabaab waxay billowday guluf cusub oo ay ku doonayso inay dib ula wareegto deegaannadii ay lumisay sannadkii 2022. Bishii Maarso 2025, kooxdu waxay isku dayday inay gudaha Muqdisho ku disho Madaxweynaha Dowladda Federaalka iyadoo adeegsatay qarax. Inkasta oo xaaladda amni ee caasimaddu weli soo hagaagayso, haddana guulaha la gaadhay looma qaadan karo kuwo si buuxda loo xaqiijiyey oo sugan.

Arrinta labaadina waxay la xidhiidhaa nooca dowladnimo ee hadda soo ifbaxaysa. Waa dowlad weli curdin ah marka laga eego awooddeeda hay'adeed, inkastoo magac ahaan ay u tahay dowlad buuxda.

Hay'adaha ay dowladaha kale inta badan dhaxlaan, Dowladda Federaalka Soomaaliya hadda ayay dhisaysaa markii ugu horraysay: maamulka dakhliga, adeeg dowladeed oo shaqaynaya, nidaam sharci iyo xeerar oo dhammaystiran, iyo adeeg diblomaasiyadeed oo u gaar ah. Hawshan waxaa lagu wadaa xaalado adag, iyadoo dib u dhacday tobannaan sano. Hannaannada shaqadu weli way kobcayaan, meelkastana si isku mid ah loogama hirgelin. Dad badan oo fulinaya nidaamyadan waxay ka tirsan yihiin jiilkii ugu horreeyey ee qabta xilal noocan ah. Miisaaniyadda Dowladda Federaalka weli waxay si weyn ugu tiirsan tahay taageerada dibadda laga helo, halka dakhliga gudaha intiisa badani uu ku urursan yahay dekedda iyo garoonka diyaaradaha ee Muqdisho. Sidoo kale, saaxiibbada caalamku weli waxay bixiyaan qayb muhiim ah oo ka mid ah taageerada ay hay'adahani ku hawlgalaan.

Si kastaba ha ahaatee, caqabadahani ma qarin karaan isbeddelka guud ee socda. Dowladda Federaalka ee fadhigeedu yahay Muqdisho maanta waxay leedahay awood maamul iyo saameyn siyaasadeed oo ka baaxad weyn tii ay hore u lahayd. Inkasta oo hannaankii saldhiggiisu ahaa Nayroobi uu weli door leeyahay, haddana wuxuu hadda la shaqaynayaa dowlad federaal ah oo awood u leh inay taabogeliso hindisayaal siyaasadeed, gasho wadaxaajoodyo, isla markaana si muuqata u qaabayso natiijooyinka siyaasadda qaranka.

## Siyaasadda Marxaladda Kala-guurka

Mowqifka Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waa in go'aannada siyaasadeed laga hago Muqdisho. Hase yeeshee, tan macnaheedu ma aha in la soo afjaro doorka beesha caalamka. Ujeeddadu waa in masuuliyadaha ilaa hadda lagu maamulayey dhexdhexaadinta dibadeed si tartiib tartiib ah loogu wareejiyo hay'adaha Soomaaliyeed.

Waa wax dabiici ah in dowlad xilka haysa ay doorbido hannaan doorasho oo siiya saamayn dheeraad ah oo ku saabsan sida awoodda loola kala wareegayo. Sidaa darteed, doodda ku saabsan in Soomaalidu hoggaamiso go'aan-qaadashada siyaasadeed waxay ka kooban tahay laba qaybood: tan koowaad waa dood ku saabsan halka awoodda siyaasadeedi maanta ku jirto; tan labaadna waa danaha degdegga ah ee dowladda markaa xilka haysa.

Dhanka kale, mucaaradku wuxuu ku doodayaa in qaab-dhismeedka hadda jira uu weli lagama maarmaan yahay. Waxay aaminsan yihiin in hay'adaha Soomaaliya aanay weli gaadhin heer madaxbannaani iyo kalsooni dadweyne oo u saamaxaya inay si cadaalad ah u maareeyaan tartanka doorashooyinka iyada oo aan la helin dammaanad ballaadhan oo ku dhisan is-afgarad siyaasadeed iyo taageero dibadeed oo lagu xoojiyo. Dooddani waxay salka ku haysaa xaqiiqo muddo dheer astaan u ahayd siyaasadda Soomaaliya wixii ka dambeeyey colaaddihii sokeeye, taas oo heshiisyada siyaasadeed lagu gaadhi jiray wadaxaajood, halka fulintoodana si dhab ah loogu tiirsanaa dhexdhexaadin dibadeed. Haddaba, welwelka jira ayaa ah in haddii maamulka doorashooyinka si buuxda loogu wareejiyo gudaha dalka, uu hal dhinac awood u yeelan karo inuu dejiyo xeerarka tartanka siyaasadeed ka hor inta aanay hay'adaha awoodda u leh xallinta khilaafaadka doorashooyinku aanay si buuxda u bislaan.

Hase yeeshee, mowqifka mucaaradka keliya kuma salaysna mabaadi'da ay sheeganayaan balse waxa kale oo qaabeeya nidaamka siyaasadeed ee ay doonayaan inuu sii jiro. Muddo dheer, mucaaradku wuxuu si wax-ku-ool ah uga dhex shaqayn jiray hannaan aan cid Soomaaliyeed oo keli ahi gacanta ku hayn xeerarka iyo habraaca tartanka siyaasadda, isla markaana ay daneeyeyaasha caalamku door muuqda ku lahaayeen dhexdhexaadinta khilaafaadka iyo ku qasbidda dhinacyada inay tanaasul sameeyaan. Haddii geeddi-socodka siyaasadda iyo doorashooyinkaba si buuxda loogu wareejiyo hay'adaha Soomaaliyeed, waxa is beddelaya isu-dheellitirka awoodda ee mucaaradku muddada dheer ku tiirsanaa.

Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka ayaa arrintan sii murjinaya, mana suurtogalayso in khilaafkan si buuxda loo fahmo iyaga oo aan la tixgelin. Puntland iyo Jubbaland labaduba way diideen isbeddellada dastuuriga ah iyo kuwa doorasho ee laga soo jeediyey Muqdisho, waxayna marar hore hakiyeen wada-shaqayntii ay la lahaayeen Dowladda Federaalka. Khilaafkooda iyo dowladda dhexe mirarka qaarkood wuxuu gaadhay heer uu wiiqo abaabulladii lagula dagaallamayey kooxaha hubeysan.

Inkasta oo dowlad-goboleedyadu yihiin dhinacyo Soomaaliyeed, haddana dooddan waxay kaga jiraan meel ka duwan dhinacyada kale oo dhan. Madaxbannaanidooda iyo awooddooda siyaasadeed waxaa muddo dheer ilaalinayey nidaam siyaasadeed oo awooddu kala baahsaneyd, isla markaana ay dammaanad ka ahaayeen daneeyeyaasha dibaddu, oo ah isla nidaamka uu mucaaradku maanta difaacayo. Nidaamkaas oo intiisa badan laga hagayey Nayroobi, laguna maamuli jiray dhexdhexaadin dibadeed, ma uusan oggolaanayn in hal dhinac oo Soomaaliyeed uu si buuxda u xukumo hannaanka siyaasadda. Taas beddelkeeda, wuxuu bannaynayey in ay jiraan xarumo awoodeed oo kala duwan, sida Dowladda Federaalka, dowlad-goboleedyada iyo jilayaal kale oo siyaasadeed. Haddii hannaanka siyaasadeed uu si qayaxan uga guuro nidaamkaas wadatashiga iyo awood qaybsiga ku dhisan kuna ururo Muqdisho, fursadda ay jileyaasha kale kusii jiri karaan awood ahaan ayaa wiiqmaysa. Sidaa darteed, diidmada ay dowlad-goboleedyadu ka muujinayaan qorshaha doorashooyinka ee Dowladda Federaalka ma aha keliya muran ku saabsan qaabka doorashada; waa diidmo ku wajahan isbeddelka awoodda siyaasadeed ee dalka. Farqiga keliya ayaa ah in khilaafkani uu u dhexeeyo Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada, halkii uu u dhexayn lahaa dowladda iyo mucaaradka.

## Marka Mabda'a iyo Dantu Isku Dhacaan

Isbeddelka ku yimid mowqifka siyaasadeed ee Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu si cad u muujinayaa isbeddelka kor lagu sharraxay. Intii lagu jiray qalalaasihii doorashooyinka ee 2021, wuxuu ka tirsanaa isbahaysigii mucaaradka ee ku doodayey in is-afgaradka siyaasadeed lagu gaadho dammaanad iyo dhexdhexaadin dibadeed, isaga oo ka soo horjeeday isku daygii Dowladda Federaalka ee uu hoggaaminayey Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ee ahaa in dowladdu yeelato door weyn oo ku aaddan maamulka geeddi-socodka doorashada. Xilligaas, Dowladda Federaalka waxay lahayd awood iyo farsamo kooban, waxayna si weyn ugu tiirsanayd taageerada dibadda.

Maanta, Xasan Sheekh wuxuu xilka Madaxweynaha ku joogaa duruufo gebi ahaanba ka duwan kuwii markaas jiray. Dowladda Federaalka waxay maanta gacanta ku haysaa qayb weyn oo maamulka dalka ah, waxay si toos ah ula macaamishaa saaxiibbada caalamka, waxayna door muuqda ku leedahay hagidda nolosha siyaasadeed ee dalka iyada oo laga hagayo Muqdisho. Marka laga eego xaaladdan cusub, doodda ah in masuuliyadda geeddi-socodka doorashooyinka ay gacanta ku hayaan hay'adaha Soomaaliyeed waxay leedahay miisaan ka culus midkii ay ahayd sannadkii 2021-kii.

Si kastaba ha ahaatee, taariikhda siyaasadeed ee Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud waxay si cad u muujinaysaa farqiga u dhexeeya mabda'a uu maanta ku doodayo iyo danaha siyaasadeed ee ku xeeran hoggaankiisa. Wuxuu xilka ku yimid isagoo ballanqaaday inuu dhammaystiri doono dastuurka isla markaana dalka ka qaban doono doorasho qof iyo cod ah. Afar sanno ka dib, labadaas ballanqaad midkoodna ma hirgelin. Bishii Maarso 2026, Baarlamaanku wuxuu muddo-xileedka Madaxweynaha iyo Baarlamaanka ku daray hal sanno oo dheeraad ah, halka uu markii hore ahaa afar sanno, isagoo isla markaana doorashooyinkii dib ugu dhigay sannadka 2027. Muddo-xileedkii Madaxweynuhu wuxuu dhammaaday 15-kii May, iyadoo aan weli lagu heshiin qorshe lagu maareeyo marxaladda kala-guurka. Isla maalintaas waxaa fashilmay wada-hadalladii ay garwadeenka ka ahaayeen Maraykanka iyo Boqortooyada Midowday ee Ingiriisku, halka bishii Juunna khilaafku isu beddelay iska horimaadyo hubeysan oo ka dhacay caasimadda Muqdisho.

Doodda ku saabsan in awoodda siyaasadeed dib loogu soo celiyo gacanta hay'adaha Soomaaliyeed waa dood mabda' ahaan adag oo macquul ah. Hase yeeshee, sida ay u adeegsatay dowladda hadda jirtaa waxay sidoo kale noqotay dood lagu sharciyeynayo sii joogitaanka talada, waana natiijada ugu weyn ee ay tahay in laga hortago. Caddaynta ugu xooggan ee taageeraysa welwelka mucaaradka ee ku saabsan awoodda hay'adaha iyo isla xisaabtankooda waxay ka muuqataa jadwalkii ballanqaadyada dowladda ee aan la fulin.

Khilaafkan sidaas darteed wuxuu ku saabsan yahay laba arrimood oo is barbar socda: mabda' iyo dano siyaasadeed. Isla isbeddellada xoojinaya doodda ah in awoodda lagu soo celiyo gacanta hay'adaha Soomaaliyeed ayaa sidoo kale ballaarinaya awoodda iyo ikhtiyaarka kuwa maanta xilka haya. Madaxweynenimada Xasan Sheekh waxay si cad u muujinaysaa ismari-waaga ugu weyn ee marxaladdan kala-guurka: dhismaha dowladnimada iyo danaha qofka hoggaaminaya geeddi-socodkaas ayaa noqday laba arrimood oo sii adkaanaysa in la kala saaro.

Doodda ah in masuuliyadda maamulka iyo go'aan-qaadashada siyaasadeed lagu wareejiyo hay'adaha Soomaaliyeed waa mid mabda' ahaan macquul ah caddeymo adagna haysata. Hase yeeshee, sida ay Dowladda Federaalka u adeegsanayso dooddaas iminka waxay dhigtay saldhig loogu meel dayanayo sii joogitaanka jagada, taasoo dhab ahaan ah natiijada ay tahay inaan sinaba loo oggolaan inay dooddaas ka dhalato. Caddaynta ugu xooggan ee xoojinaysa walaaca mucaaradka ee ku saabsan awoodda hay'adaha iyo isla xisaabtankooduna waxay ka muuqataa ballanqaadyadii dowladda lafteedu dejisay ee aan weli hirgelin ama la fulin.

Sidaas awgeed, khilaafkani kuma koobna mabda' oo keliya, balse wuxuu sidoo kale ku saabsan yahay dano siyaasadeed. Isla isbeddellada xoojinaya doodda ah in awoodda lagu soo celiyo gacanta hay'adaha Soomaaliyeed ayaa isla markaana sii kordhinaysa awoodda iyo baaxadda go'aan-qaadashada ee hay'adaha maanta haya awooddaas, taas oo yarayn karta baahida loo qabo in go'aannada lagala tashado ama lagu gaadho is-afgarad ay wadaagaan dhammaan saamileyda siyaasadda. Geesta kale Madaxweynenimada Xasan Xasan Sheekh Maxamuudna waxay muujinaysaa ismari-waaga ugu weyn ee marxaladdan kala-guurka: in mararka qaarkood ay adkaanayso in la kala saaro geeddi-socodka dhismaha dowladnimada iyo danaha siyaasadeed ee dowladda hoggaaminaysa geeddi-socodkaas.

## Qaab-dhismeed Lagu Maareyn Marxaladda Kala-guurka

Hadafku waa in si habsami leh loo maareeyo ka gudbidda nidaamkii hore ee ku tiirsanaa dhexdhexaadinta dibadeed loona gudbo hannaan cusub oo ay hoggaaminayaan hay'adaha Soomaaliyeed. Taas macnaheedu waa in la xoojiyo dowladnimada Soomaaliya, iyadoo aan la dhaawicin sharciyaddeeda siyaasadeed. Si arrintaas loo xaqiijiyo, waxaa loo baahan yahay ballanqaadyo cad oo ay qaadaan afarta dhinac ee ugu muhiimsan khilaafkan.

**Marka hore, Dowladda Federaalka,** mashruuca qaran waa inuu ka sarreeyaa masiirka siyaasadeed ee dowladda xilka haysa. Waa in lagu saleeyaa hay'ado waara, halkii uu ahaan lahaa ballanqaad siyaasadeed oo ku kooban hoggaanka markaas jira. Taasi waxay u baahan tahay afar tallaabo oo muhiim ah oo kala ah:

1. **In la dhiso Guddi Doorasho oo madax-bannaan,** xubnihiisana ay si wadajir ah u soo magacaabaan Dowladda Federaalka, mucaaradka, dowlad-goboleedyada iyo qaybaha bulshada rayidka ah, iyadoo ansixintoodana lagu meel marinayo cod aqlabiyad sare leh oo Baarlamaanku bixiyo, si aan dhinac keli ahi awood ugu yeelan in uu guddiga u afduubo danihiisa siyaasadeed.
2. **In la isla meel dhigo taariikh cayiman oo doorashada la qabanayo,** taas oo dhammaan dhinacyadu ku heshiiyaan, isla markaana aan hay'ad keli ahi xitaa Baarlamaanku awood u yeelan in uu keligiis wax ka beddel ku sameyn karo.
3. **In si rasmi ah loo daabaco jadwalka diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo miisaaniyadda doorashada,** si dib-u-dhacyo kasta loo ogaado waqtigooda, halkii laga ogaan lahaa marka geeddi-socodku dhammaado.
4. **In lagu heshiiyo hannaan ku-meel-gaar ah oo lagu maamulayo muddada u dhexaysa dhammaadka muddo-xileedka iyo qabashada doorashada,** si dowladda muddo-xileedkeedu dhammaaday ay u sii waddo hawlaha maamulka ee lagama maarmaanka ah, balse aanay awood ugu yeelan inay wax ka beddesho shuruucda ama qaabka tartanka doorashada. Madaxweynaha ayaa dib u soo ceshan kara qayb weyn oo ka mid ah kalsoonidii shacabka haddii uu si cad u ballanqaado inuu xilka ka degi doono taariikhda lagu heshiiyo, iyadoon loo eegin cidda ku guulaysata doorashada.

Marka labaad, **mucaaradka**, tallaabada ugu horreysa waa inuu si daacad ah u aqoonsadaa danihiisa siyaasadeed. Mucaaradku uma difaacayo nidaamka doorasho hadda jira in uu yahay mid dhaqan ahaan sax ah ama caddaalad ku dhisan. Balse wuxuu u difaacayaa sababtoo ah nidaamkaasi waa nidaam tartankiisu ku salaysan yahay heshiisyo iyo loollan aan lahayn hannaan sugan oo qeexan. Waxaa lagu maareeyaa heshiisyo beeleed, lacago la is dhaafsado iyo isbahaysiyo goboleed oo mar walba isbeddelaya. Mucaaradku si fiican ayuu u yaqaannaa sida looga dhex shaqeeyo nidaamkaas. Wuxuuna leeyahay shabakado iyo awood uu kula tartami karo dhinaca kale, isaga oo leh fursad macquul ah oo uu ku guulaysan karo ama ugu yaraan ku hor istaagi karo dowladda xilka haysa.

Dhanka kale, Dowladda Federaalka waxay u aragtaa nidaamkaas mid qaali ku ah siyaasad ahaan isla markaana aan la saadaalin karin. Waxay doorbidaysaa doorasho qaran oo qof iyo cod ah, maadaama ay gacanta ku hayso hay'adaha awoodda dowladda isla markaana ay awood u leedahay inay dejiso xeerarka guud ee lagu tartamayo. Sidaas darteed, dhinac kastaa wuxuu doorbidayaa habka uu rumaysan yahay inuu kaga awood badan yahay dhinaca kale. Muranku ma aha mid u dhexeeya dastuur iyo dan siyaasadeed; waa muran ku saabsan halka uu dhinac waliba filayo inuu kaga guulaysan karo kan kale.

Taasi macnaheedu ma aha in mucaaradku ku qaldan yahay ku adkaysiga heshiisyada hadda jira. Heshiisyada siyaasadeed lama burin karo marka ay caqabad ku noqdaan cidda xilka haysa, mana habboona in qof xilka sii haya isagoo muddo-xileedkiisu dhammaaday in si toos ah looga fisho inuu geeddi-socodka u maamulayo si niyad-wanaag iyo daacadnimo ku jirto. Hase yeeshee, mucaaradku laftiisu wuxuu wiiqayaa dooddiisa marka uu cabasho toos ah u beddelo taageero guud oo uu u muujiyo nidaamkii hore, kaas oo lagu dhisay Soomaaliya aan maanta jirin. U soo bandhigista nidaamkaas sidii inuu yahay hannaan waara oo aan lagama maarmaan ah ma aha mowqif dastuuri ah; balse waa mowqif lagu ilaalinayo hab siyaasadeed oo uu muddo dheer si fiican uga dhex shaqayn jiray siyaasadda Soomaaliya.

Sidoo kale, mucaaradku waa inuu ka fogaadaa taageeridda dowlad-goboleed kasta oo isku dayaya inuu geeddi-socodka doorashada u qaabeeyo si uu ugu adeego danihiisa. Qaar ka mid ah madaxda dowlad-goboleedyadu waxay doonayaan inay gacanta ku dhigaan cidda codeynaysa, cidda ka mid noqonaysa guddiga doorashada, iyo xeerarka heer dowlad-goboleed ee dammaanad qaadaya sii jiritaanka saameyntooda siyaasadeed. Haddii mucaaradku taageero dedaalladaas, wuxuu samaynayaa isla wixii uu Dowladda Federaalka ku eedaynayey. Taasi waxay burburin lahayd kalsoonida lagu qabo dooddiisa ku saabsan hufnaanta geeddi-socodka doorashada.

Jidka ugu habboon waa in mucaaradku aqbalo in doorashada qof iyo cod ahi tahay yoolka ugu dambeeya, balse uu ka dhigo heshiiska ku saabsan geeddi-socodka mid ku xidhan dammaanado dhab ah: xubno uu ku yeesho guddiga doorashada, taariikh doorasho oo aan la beddeli Karin la isla qaato, iyo in hannaan lagu heshiiyey lagu maamulo muddada kala-guurka. Marka dammaanadahaas la helo, mucaaradku waa inuu ka qayb galaa doorashada. Qaadacaadda doorashadu waxay siinaysaa dowladda xilka haysa fursadda ay sida saxda ahi tahay in laga hor istaago, taas oo ah: tartan aan cidina kula loollamin.

**Saaxiibbada caalamku** waa inay dib u eegaan habka ay ula macaamilaan Soomaaliya. Intii lagu gudo jiray soddonkii sanno ee la soo dhaafay, doorkoodu wuxuu isugu jiray dhexdhexaadinta khilaafaadka siyaasadeed iyo taageeridda hawlaha aasaasiga ah ee dowladnimada. Waxay ka qayb qaadan jireen maareynta khilaafaadka siyaasadeed, maalgelinta nidaamyada lagama maarmaanka u ah dowladnimada, iyo bixinta khibrad farsamo oo lagu kabayo meelaha ay hay'adaha Soomaaliyeed awooddoodu ka liidatay. Habkaasi wuxuu ahaa mid lagama maarmaan u ahaa duruufihii xilligaas jiray, hase yeeshee maanta xaaladdu way is beddeshay. Inkasta oo Soomaaliya ay weli u baahan tahay taageero dibadeed, haddana hay'adaheedu maanta waxay leeyihiin awood iyo kaalin muuqata oo ka weyn tii ay hore u lahaayeen marka ay timaaddo maamulka iyo hagidda arrimaha qaranka.

Sidaa darteed, waxaa habboon in mudnaanta si tartiib tartiib ah looga wareejiyo maareynta siyaasadda loona weeciyo xoojinta hay'adaha dowladda. Taasi waxay ka dhigan tahay in la xoojiyo u adeeggidda rayidka, hay'adaha amniga, maamulka guud, nidaamka dakhliga iyo qaab-dhismeedyada lagama maarmaanka u ah qabashada doorashooyinka. Shaqadani waxay noqon doontaa mid waxtar badan marka la fuliyo iyada oo loo marayo hay'adaha Soomaaliyeed, halkii laga fulin lahaa meel ka baxsan ama hannaan barbar socda hay'adahaas. Guusha laguma cabbiro tirada khilaafaadka dibadda laga maareeyo, balse waxaa lagu qiimeeyaa heerka ay hay'adaha Soomaaliyeed awood ugu leeyihiin in masuuliyadahaas iyagu si madax-bannaan u gutaan, khilaafaadkoona ugu xalliyaan.

**Turkigu** wuxuu leeyahay door muhiim ah oo ku saabsan taageeridda wada-hadallada u dhexeeya dhinacyada kala duwan ee Soomaaliyeed, maadaama uu kaalin muuqata ka qaatay dib-u-dhiska hay'adaha dowladda, gaar ahaan waaxda amniga iyo maamulka dowladda, taas oo ka badan inta ay sameeyeen inta badan saaxiibbada kale ee caalamku. Joogitaankiisa iyo doorkiisa Muqdisho ayaa sidoo kale siiyay fursad uu ku yeesho kalsooni aysan lahayn saaxiibbo badan oo kale.

Taageerada Turkigu waa inay ka gudubtaa la shaqaynta hoggaamiyeyaasha siyaasadda oo keliya, kuna fiddaa la shaqeynta ganacsatada, bulshada rayidka ah iyo kooxaha kale ee aragtidoodu inta badan ka maqnaato wada-hadallada rasmiga ah. Haddii arrintani taabogal noqoto, saameyntiisu waxay noqon doontaa mid waxtar badan marka uu ka dhigo taageero uu siinayo hay'adaha dowladda Soomaaliyeed, halkii loo fasiran lahaa taageero uu siinayo koox ama hoggaan gaar ah.

Ugu danbenytii khilaafka doorashooyinku wuxuu noqday tijaabo lagu cabbirayo isu-dheellitirka cusub ee awoodda siyaasadeed. Dowladda Federaalka waa inay muujisaa in hay'adaha dowladeed ee sii xoogaysanayaa ay la jaanqaadi karaan xaddidaadaha awoodda siyaasadeed. Mucaaradka iyo dowlad-goboleedyaduna waa inay caddeeyaan in ilaalinta dammaanadaha dastuuriga ahi aanay ku xidhnayn sii jiritaanka nidaamkii ku dhisnaa dhexdhexaadinta dibadeed. Sidoo kale, saaxiibbada Soomaaliya waa inay la qabsadaan xaqiiqada ah in Soomaaliya ay weli u baahan tahay taageero dibadeed, balse ay maanta leedahay awood ka weyn tii hore oo ay ku maamuli karto arrimaheeda gudaha.

Luulyo
2026

HERITAGE
INSTITUTE